

# Xuquuqda biilka Waalidka

**Waalid ahaan, masuulka sharciga ama qofka leh masuuliyada go'aan gaadhida ee bukaanka carruurta daryeelka heliya gudaha cusbitaalka, waxaad leedahay xaqa, si waafaqsan sharciga, ee soo socda:**

- 1) Macluumaadka cusbitalka magaca ilmahaaga adeeg bixiyaha daryeelka koowaad, haddii la garanayo, oo waxaan ka haystaa macluumaadkan ku qoran diiwaanka caafimaadka ilmahaaga.
- 2) In la hubiyo cusbitaalka waxaa keliya oggolaan kara bukaanka carruurta ilaa xadka waafaqsan kartida cusbitaalkayaga inay bixiyaan shaqaale takhasus leh, meel iyo qalab cabbirka habboon ee lama huraanka wixii ah baahiyaha hoonid ah ee bukaanada carruurta.
- 3) Si loo oggolaado ug yaraan hal waalid ama masuul inuu la joogo wakhtiyada oo dhan, ilaa xadka suuragalka ah la siiyey caafimaadka ilmahaaga iyo baahiyaha badbaadada.
- 4) In dhammaan baadhitaanada la dhammaystiray muddada la dhigay ilmahaaga ama qolka degdeg ah booqashoyinka uu dib u eegay dhakhtarku, kaaliyaha dhakhtarka, ama kalkaalisada ee taqaana xaalada bandhiga ilmaha.
- 5) Ilmahaaga inaan laga saarin cusbitaalkayaga ama qolka gurmada ilaa baadhitaano kasta taas oo macquul ahaan la fili karo inay keenaan natiijooyinka qiimaha dhabta ah waxaa dib u eega dhakhtarka, kaaliyaha dhakhtarka, iyo/ama kalkaalisada oo kaala soo xidhiidha adiga ama go'aan gaadhaha kale, iyo ilmahaaga, haddii ay habbontahay. Qiimaha dhabta ah ee natiijooyinka soo jeediya mid nolosha halis ku ah ama xaalad kale oo wayn haddii kale oo u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah.
- 6) Ilmahaagu inaan laga saarin cusbitaalkayaga ama qolka gurmada ilaa adiga ama ilmahaaga, haddii ay habboon tahay qorshaha ka saarida qoran la helo, taas oo sidoo kale hadal ahaan lagaala xidhiidhay adiga iyo ilmahaaga ama kuwa kale ee go'aamada gaadhaya. Qorshaha qoran ee ka saarida cusbitaalka waxay si gaar ah u caddayn doonaa natiijooyinka dhabta ah ee ee shaybaadka ama baadhitaanada kale ee la amaray muddada ilmahaagu joogay oo waxaan aqoonsan doonaa baadhitaano kasta aoo kale oo aan weli la soo gebagebayn.
- 7) Si loo siiyo natiijooyinka qiimaha dhabta ah iyo qorshaha ka saarida ilmahaaga qaab macquul ahaan xaqiijisa in adiga, iyo ilmahaaga (haddii ay habbontahay), ama go'aanka kale ee caafimaad fahma macluumaadka caafimaadka la bixiyey si loo sameeyo go'aamada caafimaadka habboon.
- 8) Adeeg bixiyaha daryeelka koowaad ee ilmahaaga, haddii la garanayo, in la siinayo dhammaan natiijooyinka shaybaadhka ee cusbitaal dhigada ama booqashada qolka gargaarka degdega ah.
- 9) In la codsado macluumaadka ku saabsan cudur baadhida ama cudur baadhida suuragalka ah laga fekeray muddada dhacdada ee daryeelka iyo ka sii darida horumarin kara siiba macluumaadka ku saabsan xidhiidh kasta oo lala sameeyay adeeg bixiyaha ilmahaaga daryeelka koowaad.
- 10) In la siiyo, marka uu ka baxyo ilmahaagu cusbitaalka ama waaxda gurmada, lambarka telefoonka aad ku soo waci karto wixii ah talo hore dhacdada ka sii darka ama su'aalaha yimaada ee ku saabsan ilmahaaga xaaladiisa.

Sharciga Caafimaadka Dad waynaha (PHL) 2803(i)(g) Xuquuqda Bukaabada 10NYCRR, Qaybta 405.7



Department  
of Health